

Procedural Safeguards & Parent/Guardian Notices

Habraaca Badbaadinta iyo Ogeysiisyada Waalidiinta iyo Masuuliyiinta

Waxa soo socda qoraal lagu soo koobey qaar ka mid ah xuquuqaha dhallaanka naafada ah iyo waalidiintooda. Fadlan u fiirso buugga yar ee *Habraaca Badbaadinta Dhallaanka ah iyo Waalidiintooda* si aad u hesho macluumaad waafi ah.

KAQEYBGALKA WAALIDKA EE WAX KU OOLKA AH (MEANINGFUL PARENT PARTICIPATION)

- Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay ka qeybgalaan kulammada looga hadlayo asteymta ama tilmaanta, qiimeynta iyo boos fadhiisinta ardaygoda iyo inuu helo waxbarasho xor ah oo ku habboon, sida lagu xusay Individual Education Program (IEP) (Barnaamijka Waxbarashada Qof Walba). Shaqaalaha dugsiya waa qabsan karaan kulamo dadban oo aan walidka ka qeygelin.
- Dib-u-eegis sannadle ah ayaa lagu sameeynayaa waxbarashada gaarka, iyadoo la raacayo nidaamka Individual Education Program (IEP) (Barnaamijka Waxbarashada Qof Walba), waalidiinta kaalin firfircoon ayey ku yeelanayaan dib-u-eegista.
- Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay helaan warbixinnada horumarka ardayga ee ku aaddan ahdaafta Individual Education Program (IEP) (Barnaamijka Waxbarashada Qof Walba) xilliga uu dugsiya qeybinayo kaararka warbixinnada ardayga dugsiya oo dhan.

XOGAHA WAXBARASHADA IYO QARSOODINIMADOODA (EDUCATIONAL RECORDS and CONFIDENTIALITY)

- Waalidiinta waa eegi karaan xogta waxbarashada gaarka ah ee ardaygoda. Xogahaan waa qarsoodi, waxaana lagu keydiyaa armaajo qufulan oo ka duwan meesha caadiga ee xogaha kale ee dugsiya lagu keydiyo. Xogahan lalama wadaagi karo cid kale iyadoo aan oggolaansho laga heysan waalidka ardayga, marka laga reebo shaqaalaha degmada ee doorka ku leh waxbarashada ardayga.
- Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan in la saxo xogta ardayga haddii ay aaminsan yihiin inay xogta qalad tahay ama tahay marin habaabin.
- Haddii ay codsadaan nuqullada xogta ardayga waalidiinta waxaa loogu soo saarayaa muddo macquul ah gudaheed.

OGGOLAANSHO (CONSENT)

- Waalidiinta waa in laga helaa oggolaansho qoraal ah ka hor intaan caruurtooda loo sameynin qiimeynta oo aan la fadhiisin waxbarashada gaarka ah.
- Oggolaanshaha waalidiinta waa isxilqaamid, waxayna si qoraal ah uga noqon karaan markii ay la tahay.
- Waa siyaasadda Utah State Office of Education (USBE) (Xafiiska Waxbarashada Gobola Utah) inay gudbiso xogaha waxbarashada ardayga, iyadoo aan waalidiinta ama ardayga masuulka ah aan oggolaansho la weydii, haddii si rasmi ah loo ogeysiyo inuu ardayga uu rabo inuu u wareego dugsi ama degmo kale.

QIIMEYNTA MADAXA BANAAN EE WAXBARASHADA (INDEPENDENT EDUCATIONAL EVALUATION)

- Waalidiinta waxay weydiisan karaan in loo sameeyo qiimeyn waxbarasho oo madax bannaan, haddii ay waafaqsaneen qiimeynta ay sameeyeen kooxda dugsiga. Macallinka waxbarashada gaarka ah ayaa u tilmaami kara walidiin agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmada si ay ugala hadlaan codsigooda iyo habraaca loo marayo.

ANSHAXMARINTA (DISCIPLINE)

- Xuquuqda ardayda naafada ah ee la xiriirta anshaxmarinta, waxay waafaqsan tahay nidaamka ammaanka dugsiga ee Davis School District (DSD) (Dugsiyada Degmada Davis). Wargelin faahfaahsan waxa laga helayaa uuga yare ee *Habraaca Badbaadinta Dhallaanka Naafada ah iyo Waalidiintooda*.
- Ardayda waxay xaq u leeyihiin inay helaan adeegyada ku habboon horumarka ay ka sameeyeen waxbarashada guud iyo ahdafta Individual Education Program (IEP) (Barnaamijka Waxbarashada Qof Walba), haddiiba ay dhacdo in laga ceyriyo dugsiga muddo ka bada 10 maalmood, qaab tallaabooyin anshaxmarin ah.

NIDAAMKA LOOGA DACWOONAYO (COMPLAINT PROCESS)

Davis School District (DSD) (Dugsiyada Degmada Davis) waxay rabtaa inay xaqiijiso in welwelka waalidiinta ee la xiriira barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ardaydooda la joojiyo):

1. *Kulanka Kooxda IEP* (IEP team meeting)
2. *Maamulaha Dhismaha* (Building Principal)
3. *Kormeeraha Degmada ee SPED* (District SPED Supervisor)
4. *Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah*
5. *Maamulaha Guud ee Degmada* (District Superintendent)
6. *USBE – Adeegga Waxbarashada Gaarka ah* (Special Education Services (SES))

- Haddii walwalka waxa laga qaban waayo, oo ay waalidiinta dareensan yihiin inay Degmada ku xadgudubtey masuuliyada Individual with Disabilities Education Act (IDEA) (Sharciiga Waxbarashada dadka naafada ah ama baahiyaha gaarka ah qaba), oo ay rabaan inay si qoraal ah ugu ashtakoodaan, dacwadda waa in loo keena Maamulaha Guud ee Degmada ama Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah ee Utah State Office of Education (USBE) (Xafiiska Waxbarashada ee Gobolka Utah) ee Gobolka, oo baaritaan ku sameynaya ama magacaabi doona qof baaris ku sameeya dacwadda la keenay.)
- Haddii ay degmada ku guul dareysato inay xal ka qaarto dacwadda, nidaam dhexdhexaadin ayaa la soo jeeinayaa. Haddii nidaamka dhexdhexaadinta uu guul darreysto, waalidiinta waxay weydiisan karaan dhegeysi maxkamadeed ee dacwadda. Codsigan waa in si qoraal ah loogu keena Maamulaha Guud ee Degmada.

DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY (PRIVATE SCHOOL)

- Davis School District (DSD) (Dugsiyada Degmada Davis) waxaa laga doonayaa inay ku wargeliso waalidiinta inay jirto minxa waxbarasho oo ardayda uu suuragelinaysa inay ardayda naafada ah wabarasho ka heelaan dugsiiyo gaar loo leeyahay. Barnaamijka waxaa la yirahdaa Barnaamijka Minxada Carson Smith (Carson Smith Scholarship). Wargelin ku saabsan barnaamijka waxbarasho ee ardayda baahiyaha gaarka qaba waxaa laga helayaa mareegta websiteka Utah State Office of Education (USBE) (Xafiiska Waxbarashada Gobolka Utah) <https://www.schools.utah.gov/specialeducation/resources/scholarships>
- Waliddiinta ayaa laga doonayaa inay agaasimaha waxbarashada gaarka ee degmada ay qoraal ahaan u gaarsiiyaan haddii ay rabaan inay ardaygooda kala baxaan dugsiga caamka ee dawladda, oo ay doonayaan inay geestaan dugsii gaar loo leeyahay, **ayna doonayaan in loo soo celiyo kharashka kaga baxa.**

Note to educator: (Ogeysiin ku socota macallimiinta): Markii aad akhrineysid qoraalkaan, waxaad ku bedd kartaa ereyga “walid”, qofkii kale oo ka masuul ama argay qaangaar ah, hadba sida ku habboon).